



## **OGAYSIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN CAABUQA KORONAFAYRAS(COVID-19) OO LOOGU TALO GALAY DHAMMAAN QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA KU NOOL NAWAAXIGA MAGAALOOYINKA**

**(Lasoo saaray: 22-ka Abriil 2020)**

15-ka Maarso 2020, Dowladda Kenya waxay ku dhawaaqday tallaabooyin gaar ah oo looga hortagayyo faafida Caabuqa Koronafayras(COVID-19). Laga bilaabo, 27-ka Maarso 2020-ka, **waxaa jira bandow joogta ah inta u dhaxaysa 7-da fiidnimo illaa 5-ta aroornimo**. Lama ogola inaad ka baxdaan guryihiinna inta lagu jiro wakhtigaan, am waa la idin xirayaa. **Hadii kale, laga yaba in ey dowladdu ku karantiisho xarun loo qoondeeyey ilaa iyo muddo 14-maalmood oo adiga kharashaadkaga ah.**

Intaa waxaa sii dheer, in 6-da Abriil 2020, Dowladda Kenya ay ku dhawaaqday **inaysan jiri doonin soo galis iyo ka bixitaan Nawaaxiga Magaalada Nayroobi laga billaabo 6-da Abriil 2020 iyo sidoo kale degmooyinka Kilifi, Kwale iyo Mombasa laga billaabo 8-da April 2020**. Ha sameynin isku day kasta oo ah inaad soo gasho ama ka baxdo agagaarkaan haddii kale waa lagu xiri doonaa. Waad ku socsocon kartaa gudaha deegaanka aad ku nooshahay.

**Waa inaad xirataa maskaraha wejiga marka aad ku sugan tahay goobaha caamka ah. Tani waxaa loogu talo-galay badbaadada waana dantaada. Intaasi waxaa sii dheer, waxaa sidoo kale gacan ka gaysan doontaa yareynta faafitaanka cudurka Koronafayres (Covid-19) Balse waxaa muhiim ah inaad ogaato:** Haddii aadan xiran maskaraha wajiga, waxaa lagugu ganaaxayaa lacag dhan 20,000 Kenya Shilin amaba 6 bilood oo xarig ah ama labadaba.

Lacalla haddii dowlada ay ka samayso baaritaan caafimaad baaxad leh goobo kala duduwan si loo xakameeyo faafitaanka cudurka Covid-19, oo adigana joogtid goobahaas, fadlan wada shaqayn la yeelo **shaqaalaha wasaarada caafimaadka.**

**Fadlan haku warwareegin meelaha si micno darro ah dharaartii.** Haddii ay daruuri tahay inaad socoto, waa in marwalba **sidataa warqadahaaga aqoonsiga.**

Intaas ka sokow, **la soco** tilmaamaha ay soo saartay Dowlada Kenya oo xaqiiji inaad u hoggaansanaato.

### **Lambarrada Gargaarka Degdegga ah**

- **Diiwaangelinta / xaaladaha degdegga ee warqad-siinta:**  
Xoghaynta Arrimaha Qaxootiga Shauri Moyo: 0772057770
- **Khadka Caawinta ee UNHCR:** 0800720063 (bilaash ah)
- **Xaaladaha degdegga ee Caafimaad:** NCKK 0704873342 / 0723281352/ 0723281362
- **Xaaladaha degdegga ee la xiriirta sharciga (sida xiritaan, dhibaatayn boolis):** Kituo cha Sheria 0721991736
- **Xaaladaha degdegga ee maciishada:** Danish Refugee Council 0800720181
- **Arrimaha la xiriira Caymiska NHIF (Sanduuqa Caymiska ee Isbitaalaadka Qaranka):** 0740049502
- **Khadka Tooska ah ee la talinta:**  
1190
- **Khadka Tooska ah ee Rabshadaha la Xiriira Jinsiga:**  
1195/ 0800720501
- **Khadka Tooska ah ee Ilaalinta Caruurta :**  
116

Haddii aad leedahay **mid ka mid ah calaamadaha Caabuqa** Koronafayras (COVID-19) sida qandho, qufac, neef-tuur iyo neefsashada oo kugu adkaata, **fadlan kala xiriir Wasaaradda Caafimaadka** halkaan 0800721316 (bilaasha ah); 0732353535; ama 0748592558 si lagu hago.